

Warbixin ku socota ardayda dugsiyada sare iyo waalidiinta kuna saabsan waxbarasho masaafeed.

2020-03-27

Salaan

Warbixintaan waxey ku socotaa ardayda dhigata mid ka mid ah dugsiyada sare ee degmada Norrköping iyo waalidiintooda. Sida aad hore warbixinteeda u heshay waxaa laga bilaabo 19 bisha maarso dugsiyada sare ee degmada oo dhan ka hirgalaya waxbarasho masaafadeed (guriga iyada oo la joogo ayaa waxbarashada la dhiganayaa iyada oo tusaale ahaan kombiyuutarka la isticmaalayo). Waan fahmi karnaa in ey isbedel weyn kugu noqoneyso laakiin waan qaddarineynaa dadaalkaada waxbarasho iyo gacanta aad ka geysaneysid sidii ey waxbarasho masaafeedkaan sida ugu wanaagsan ugu shaqeyn laheyd.

Muhiim ayey noo tahay in aad waxbarashadaada dhameysatid waxaana mar walbaa ka shaqeyneynaa in aan kuu sameyno waxa aad u baahan tahay si aad u najaxdid.. caawintaada ayaan shaqadaan ugu baahannahay waxaadna masuuliyad dheer iska saareysaa waxbarashadaada. Sidaas darteed waxaan rabnaa in aad muujinno muhiimada ey leedahay in ahmiyadda la siiyo waxbarashada.

- Goob waxbarasho oo kuu gaar ah ka sameyso guriga
- Raac rootiinkaaga caadiga ah ee maalinlaha ah
- Raac jadwalkaaga caadiga ah
- Xiriir maalinle ah la yeelo macallimiinta xisooyinka leh

Waxbarashada sideeda caadiga ayey u dhaceysaa, waxaana sidii hore oo kala lagaa sugaayaa inaad si firfircoon uga qeyb qaadato. Waan fahansannahay iney juhdi badan kaa rabto waxaana rajeyneynaa in aad iska kaashanno. Muhiim ayey noo tahay in aad najaxdid isla markaana aad sidii qorsheyneyd u dhameysatid waxbarashadaada. La xiriir macallinka masuulka kaa ah haddii aad caawimaad u baahan tahay.

Shaqaalaha iskuulka ayey joogaan haddii aad u baahan tahay inaad iskuulka alaab kasoo qaadato ama haddii aad u baahantahay in waxbarashada lagaa cawiyo. La xiriir macallinka masuulka kaa ah waqtina ka qabso markaad imaaneysid si eysan u noqon isla waqti ey xisad kale jirto.

Waxyaabahee ayaad ku fekereysaa xilliga waxbarasho masaafeedka?

Waxbarasho masaafeed waxey ka dhigantahay in maalmo buuxo oo iskuulka la dhigto iyo inaad raacdo jadwalkaaga caadiga ah sida ugu wanaagsan uguna macquulsan. Macallinkaaga wuxuu xiso kasta xaadirinayaa ardayda. Ogoow in maqnaasho lagu qorayo haddii aadan is xaadirin in aad joogto. Haddii aad

xanuunsan tahay waa in aad sheegtaa sida caadiga ah. Booqo bogga internetka ee iskuulka si aad warbixin u heshid.

Casharradaada waxey ka koobnaana doonaan kuwo macallinka soo jeedinayo iyo kuwo adiga lagu dirayo inaad iskaa uga soo shaqeytid. Macallinkaaga ayaa kugu wargelinayo sida ay waxbarashada u dheceyso. Waa muhiim in aad marwalba kontorooshaa iimeelkaaga.

Ka arday ahaan waxaad qaadeysaa masuuliyadda in aad koorsooyinkaaga ka shaqeytid aadna raacdid jadwalkaaga sida ugu macquulsan. Waxaad mar walba heysataa fursad aad macallinkaaga kula xiriiri kartid haddii aad u baahan tahay caawimaad ama warbixin dheeraad ah. Adiga ayaan halkan kuu juugnaa.

waxbarasho masaafeed, sidee ayaa dijitaal ahaan loogu shaqeyaa?

Raac jadwalkaaga waxaadna gashaa kombiyuutarkaaga ardayga waxaadna sii gashaa akoonkaaga google kaasoo aad macallinkaaga ka heshay waqti fiican ka hor inta uusan casharka billaaban.

Xisadu waxey ka dheceysaa inteeda badan sistemka *Google Classroom* iyo *Google Meet* (fiidiyow ahaan), kuwaasoo aad arkeysid markaad akoonkaaga gashid.

Haddii sababo jira awgeed aadan fursad u heysanin inaad gurigaaga waxbarashada kala socotid waxaad heysataa fursad aad iskuulka wax ugu barna karto. Haddii ay sidaas tahay waxaad la xiriirtaa macallinka kaa masuulka ah.

Haddii kombiyuutarkaaga uu jabo ama uusan shaqeyneyn waxaad la xiriirtaa shaqaalaha masuulka ka ah IT-ga iskuulka. Haddii aadan garaneyn qofka masuulka ka ah IT-ga iskuulkaada waxaad la xiriirtaa macallinka kaa masuulka ah. Haddii aad aalad kale oo dijitaal ah heysatid taas ayaa ka galeysaa Google si aad xisaddaada uga qeyb qaadato.

Warbixin iyo su'aalo iyo jawaabo ku saabsan waxbarasho masaafadeed waxaad ka heleysaa bogga internetka ee degmada Norrköping
<https://www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/distansundervisning-for-dig-som-gar-i-kommunal-gymnasieskola>

Haddii aad u baahan tahay qof aad la hadasho

Shaqaalaha caafimaadka ardayda ee sikuulka wey joogaan waxaa loo heli sidii caadiga aheyd oo kale. Nala soo xiriir haddii aad welwelsan tahay ama eysan xaaladaada wanaagsaneyn Qeybta caafimaadka waxaa laga heli karaa iimeel, taleefan ama Skype. Haddii aad rabto kulan waji ka waji ah inaad nala yeelatid isla markaana nala hadashid, nala soo xiriir waqti ayaan qabsaneynaaye.

Salaan diirran

Xafiiska waxbarashada